

# QORSHAHA LAGU DHAQMAYO

**AYADOO LA MARAYO MARNA LAMA OGOLA: TILAABO QORSHE LAGU JOOJINAYO XADGUDUBKA IYO DHIBAATAYNTA GALMADA LA XARIIRTA** (IT'S NEVER OKAY: AN ACTION PLAN TO STOP SEXUAL VIOLENCE AND HARASSMENT), WAXAAN QAYBTEENA KA QAADANAYNAAN IN AAN ONTARIO KA DHIGNO MEEL AMAAN AH OO AAN LAHAYN QATAR IYO BAQDIN AMA AAN LALA KULMIN XADGUDUB IYO DHIBAATAYN GALMADA LA XARIIRTA.

QORSHAHA WAXAA KU JIRA IN:

- 1** In la dajiyo sharuuc si loo xoojiyo xeerarka la xariira xadgudubka iyo dhibaataynta galmada ee goobaha shaqada, goobaha waxbarashada, guryaha iyo tan ka timaadda nidaamka dacwada bulshada.
- 2** In la sameeyo olole barnaamij wacyigalin iyo waxbarid bulsho oo gaaraysa Ontario oo dhan, si wax looga qabto dhaqamada, loona hormariyo isbadal dhaqso ah oo wax ka qabta dabeecadda kufsiga ah, lana dhiirigaliyo isbadal mudo-dheer jira oo lagu joojiyo dhaqanka iyo dabeecadaha qotada-dheer.
- 3** In la sameeyo nidaam ogolaada in hay'adaha fulinta ee dowladdu ay yeeshaan fahan naxariis leh oo ku dhiirigalin kara dadka loo gaystay xadgudubka galmada la xariira in ay soo dacwoodaan.
- 4** In la sameeyo nidaam, lana xaqiijiyo sida ugu fiican ee taageero naxariis iyo dareen leh ay hay'adaha fulinta sharcigu u bixin lahaayeen, si dadka soo maray xadgudubka iyo dhibaataynta galmada la xariirta loogu dhiirigaliyo in ay soo dacwoodaan.
- 5** In manhajka Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka (Health and Physical Education), lagu kordhiyo inay ardayda heerarka 1-12 si qotodheer u fahmaan arimo muhiim ah oo la xariira saaxiibtinimada wanaagsan iyo ogolaanshaha galmada.
- 6** In la xoojiyo taageerada ay bixiyaan isbitaalada ee Xaruumaha Daryeelka Dhibaatooyinka Galmada iyo Qoysaska la xariirta si loo sameeyo helitaan daryeel, ku haboon ee waqtigii loo baahnaa 24/7.
- 7** In shaqaalaha caafimaadka, adeegyada bulshada, waxbarashada iyo qaybaha cadaaladda loo sameeyo tababaro dhamaystiran oo si fiican loogu caawinayo dadka soo maray xadgudubka iyo dhibaataynta galmada la xariirta iyo in tababar loo sameeyo shaqaalaha qaybaha martigalinta (hospitality) si loogu dhiirigaliyo in ay ogaadaan sida loo caawiyo xaaladaha qatarta keeni kara.

(bogga xiga ayuu ku sii qoran yahay)

8

In la joogteeyo oo la kordhiyo maalgalinta xarumaha bulshada ee dhibaataynta galmada la xariirta.

9

In la sameeyo barnaamij talobixin siiya dadka soo maray dhibaataynta galmada la xariirta, oo kiisaskoodu uu maxkamadda marayo.

IO

In la sameeyo fadhi joogto ah oo Ontario looga dhigayo hogaamiyaha Canada ee arimaha la xariira xadgudubka ka soo horjeeda dumarka.

II

In kor loo qaado sharuucda si loo xoojiyo fulinta Xeerka Caafimaadka iyo Amaanka Xirfadaha la xariira, iyada oo ay ku jirto samaynta Qodob Fulin, si shaqo-bixiyayaasha looga caawiyo in ay sameeyaan sharuuc xoogan oo ka soo horjeeda dhibaataynta galmada la xariirta.

I2

In la sameeyo maalgalin wax ku ool ah oo fanaaniinta Ontario ay ku sameeyaan mashruucyo keeni kara in laga wada hadlo arimaha ku saabsan ogolaanshaha galmada, dhaqanka kufsiya iyo sinaansaha jinsiyada.

I3

In la sameeyo maalgalin wax ku ool ah oo fanaaniinta Ontario ay ku sameeyaan mashruucyo keeni kara in laga wada hadlo arimaha ku saabsan ogolaanshaha galmada, dhaqanka kufsiya iyo sinaansaha jinsiyada.



Caawinaad, wac 211 ama booqo 211.ca  
Warbixin dheeri ah, booqo [ontario.ca/itsneverokay](http://ontario.ca/itsneverokay)